# U Diyaargarowga Ballanta Baaritaanka Maqalka ee Dhallaankaaga

Barnaamijka Baaritaanka Dhallaanka ee Minnesota

### Ballanta baaritaanka maqalka ee dhallaankaaga

Taariikhda (BB/MM/SSSS):

Wakhtiga (Subaxnimo/Galabnimo):

Magaca Rugta Caafimaadka:

Telefoonka Rugta Caafimaadka:

## Waa maxay maqalyaqaan/dhakhtarka maqalka?

Maqalyaqaanku waa xirfadle daryeel caafimaad oo loo tababaray inuu baaro oo maareeyo maqal la'aanta ku dhici karta dhallaanka, carruurta, iyo dadka waaweyn. Qofka maqal la'aanta qaba waxaa laga yaabaa inuu awoodo inuu maqlo dhawaaqyada qaarkood halka kuwa kalena laga yaabo inay waxba aysan maqlin. Waxaa jira noocyo kala duwan oo maqal la'aan ah iyadoo lagu salaynayo dhibaatada gaarka ah ee ka jirta hal ama dhowr qaybood oo dheg-ta(aha). Qiimaynta dhammaystiran ee nooca iyo darnaanta maqal la'aanta labudaba ee uu sameeyo khabiirka maqalyaqaanka ah ee carruurta ayaa muhiim ah si loo hubiyo qorshaha ugu saxan ee dabagalka iyo maaraynta wax maqal la'aanta.

## Waa maxay sababta dhallaankaygu ula kulmayo maqalyaqaanka?

Baaritaanka maqalka ee dhallaankaagu maray markuu dhashay/wax yar kadib dhalmada wuxuu ahaa baaritaan tijaabo ah. Hadduu dhallaanku uusan ku gudbin baaritaanka tijaabada ah, wuxuu baaritaanku inoo sheegayaa inuu baaritaan dheeraad ah ku sameeyo maqalyaqaanka/dhakhtarka maqalka. Qiimaynta dhammaystiran ee uu sameeyo maqalyaqaanka ayaa ah qaabka kaliya ee sida hubaasha lagu ogaan karo in dhallaankaagu maqlayo dhammaan dhawaaqyada muhiimka u ah hadalka iyo barashada luuqadeed.

## Muddo intee le'eg ayay balantu qaadan doontaa?

Ballantu waxay qaadan kartaa 1-3 saac. Mararka qaarkood had iyo jeer suurtagal ma ahan in hal ballan lagu dhammeeyo baaritaanka maqalka. Haddii ballan labaad loo baahdo, waa la qaban doonaa sida ugu dhakhsaha badan.

## Maxaan horay u soo qaadaa oo aan la imaadaa ballanta dhallaankayga?

- Kaarkaaga caymiska
- Warqadda gudbinta haddii loo baahdo
- Liiska daawooyinka hadda la qaato
- Natiijooyinka baaritaanka maqalka ee hore iyo/ama qiimeynada
- Tafaasiisha ku saabsan taariikh kasta oo qoyseed ee maqal la'aanta carruurnimo
- Magacyada/cinwaanada shaqsiyaadka aad rabto in warbixinta loo diro

## Maxay tahay inaan sameeyo ballanta kahor?

Tijaabooyinka ayaa inta badan si fudud loo samayn karaa iyadoo dhallaankaagu jiifo/hurdayo. Si loo hubiyo in dhallaankaagu hurdo inta lagu gudajiro baaritaanka:

- Ha u oggolaan dhallaankaaga inuu seexdo xilliga ballanta kahor ama inta uu gaariga u soo raacayo rugta caafimaadka.
- Iska ilaali inaad quudiso dhallaankaaga kahor xilliga ballanta. Waxaad awoodi doontaa inaad ku quudiso dhallaankaaga xarunta dhexdeeda wax yar kahor xilliga baaritaanka.



## Maxaa dhici doona inta lagu gudajiro ballanta baaritaanka maqalka?

Maqalyaqaanku wuxuu uruurin doonaa macluumaadka ku saabsan taariikhda caafimaad ee dhallaankaaga, uurkaaga/foosha/umulida ilmahaaga, iyo taariikhda qoyska.

Inta uu ilmahaagu hurdayo, maqalyaqaanka ayaa baari doona dhallaankaaga dhegihiisa oo samayn doona qiimaynta maqalka. Nooca baaritaan ee la samaynayo waxaa ka mid noqon kara:

- Jawaab-celinta Maskaxda Xilliga Wax Maqalka (ABR) – Qalab dareemeyaal ah ayaa lagu xiri doonaa wejiga iyo cakawga/dacallada dhegaha ee dhallaankaaga si loo cabbiro ka jawaab-celinta maskaxda ee dhawaaqyada. Samaacado telefoon ayaa la gelin doonaa dheg kasta si loogu daaro dhawaaqyada tijaabada ah. Dhallaankaagu jir ahaan kama jawaab-celin doono dhawaaqyada, balse qalabka wax dareema ayaa cabbiri doona sida wanaagsan ee dhallaankaagu uga jawaab-celinayo dhawaaqyada kala duwan. Baaritaankani wuxuu gacan ka geystaa in la go'aamiyo inuu jiro wax maqal la'aan ah. Haddii ay maqal la'aani jirto, tijaabadani ayaa bixin karta macluumaad ku saabsan nooca wax maqal la'aanta.
- Dhawaaqyada Kooklayda Dhegta (OAE) – Caarada cinjir jilicsan ayaa la gelin doonaa dheg kasta si loogu daaro dhawaaqyo hooseeya iyo si loo cabbiro gebikayeerka dhaca marka dhegtu si caadi ah u shaqayso. Baaritaankan ayaa sida caadiga ah waxaa lala sameeyaa baaritaano kale si loo helo ogaanshaha xaaladeed ee ugu saxan.
- Baaritaanka qaybta dhexe dhegta – Caarada jilicsan ayaa la gelin doonaa dheg kasta taasoo cabbiraysa sida wanaagsan ee reemaha dhegtu u dhaqaaqdo. Baaritaankan, marka lala sameeyo baaritaano kale, wuxuu bixin karaa tilmaamo ku saabsan sababta suurtagalka ah ee keentay maqal la'aanta.

## Dhallaankaygu ma dareemi doonaa wax xannuun ah?

Dhallaankaagu ma dareemi doono wax xannuun ah wakhti kasta inta lagu gudajiro baaritaanka. Meelaynta ama gelinta caarada cinjirka jilicsan iyo qalabka wax dareema ma dhaawici doonaan dhallaankaaga. Inta badan dhallaanka dareenkooda ayaa kaca wayna is-ruxaan marka ugu horraysa ee qalabka tijaabada ah lagu xiro dhegtooda balse way iska degaan marka dhabta la saaro oo maro lagu qabto.




## Ma heli doonaa natiijada baaritaanka isla markaaba?

Maqalyaqaanka ayaa awood u yeelan doona inuu kuu sheego goorta natiijada baaritaanka la heli karo iyo cidda ku siin doonta natiijooyinka. Haddii ay jiraan su'aalo aad ka qabto natiijooyinka, waa inaad la xiriirto rugta caafimaadka maqalka.

## Maxaa dhici kara haddii ilmahaygu uusan ka seexan bilawga ilaa dhammaadka baaritaanka?

Hadduu dhallaankaagu yar yahay, waxay u badan tahay inuu seexdo xilliga baaritaanka, balse mararka qaarkood ballan dheeraad ah ayaa loo baahan karaa. Qaar ka mid ah dhallaanka waaweyn, suuxiso ayuu dhakhtarka ku talin karaa in la siiyo dhallaankaaga si ay uga caawiso inuu seexdo xilliga baaritaanka oo dhan ee loo baahan yahay si qiimayn dhammaystiran loo sameeyo. Si loo yareeyo suurtagalnimada in suuxiso la siiyo, waxaa lagugula talinayaa inaad ballan u qabsato sida ugu dhakhsaha badan.

## Maxaa dhici kara haddii aan mashquulo, oo aan rabo inaan dib u dhigo ballanta dhallaankayga?

Aad ayay muhiim u tahay inuu maqalyaqaanku arko dhallaankaaga. Haddii aadan ballanta imaan karin, fadlan isla markiiba dib u dhigo ballanta baaritaanka maqalka.



Barnaamijka Baaritaanka Dhallaanka Cusub ee Minnesota (Minnesota Newborn Screening Program) | www.health.state.mn.us/newbornscreening
P.O. Box 64899, St. Paul, MN 55164
Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale:
La xiriir health.newbornscreening@state.mn.us
ama wac (800) 664-7772 *turjubaano ayaa la heli karaa